

Waa maxay TB?

Qaaxada (TB) waa cudur uu bakteeriyada sababo. Markii qof TB ku qabo sambabta uu qufaco ama hindhiso, waxay bakteeriyada TB ku faafinaayaan hawada. Haddii aad neefsato bakteriyadaan, hal ka mid ah seddaxdaan waxood ayaa dhici doono:

- Jirkaaga wuxuu dili doonaa bakteeriyada TB si uusan waxyeello ku geysan iminka iyo mustaqbalka
- Bakteeriyada TB ayaa xanuun kugu bilaabi doono – kani waxaa lagu magacaaba **TB'da firfircoon**
- Bakteeriyada TB wuxuu ku dhuumaan doonaa jirkaaga – kani waxaa lagu magacaaba **TB'da qarsoon**.

Ku saabsan TB'da firfircoon

Markii ay dadka ka hadlaan TB, waxay badanaa ka wadaan 'TB'da firfircoon'. Haddii aad qabtid TB'da firfircoon, bakteeriyada xannuun ayuu kugu dhalin karaa iyo dadka kale ayaad u gudbin kartaa ama ku faafin kartaa cudurka TB. TB'da firfircoon aad ayuu u waxyeelayn karaa caafimaadkaaga, laakiin waxaa lagu daaweyn karaa daawo.

Ku saabsan TB'ga qarsoon

Haddii aad qabtid TB'da qarsoon, bakteeriyada TB ee jirkaaga ayaa 'qarsoon ama hurda'. Ma xanuunsaneysid iyo dad kale ma u gudbin kartid TB'da. Hase-yeeshee, bakteeriyada waxay mustaqbalka isku beddeli kartaa mid 'firfircoon', kaasoo kugu dhalinaayo xanuunka TB'da firfircoon. Nasiib wanaag, TB'da qarsoon waa **la daaweyn karaa** si looga hortago inaad ku xanuunsato.

WAXAAD QAADI KARTAA TB'DA QARSOON AMA MIDKA FIRFIRCOON XITTA HADDII LAGUGU SAMEEYAY TALLAALKA BCG.

Sidee ku ogaan karaa inaan qabo TB'ga qarsoon?

Haddii aad qabtid TB'da qarsoon, ma lahaan doontid calaamado. Habka kaliya lagu ogaan karo inaad qabtid TB'da qarsoon waa markii dhiigga ama maqaarka lagaa baaro. Haddii aad qabtid TB'da qarsoon, daawada iminka la helo ee lagu siin doono wuxuu dili doonaa bakteeriyada ka hor intuu isku beddelin mid firfircoon ee waxyeello kuu keeni karo.

KA HORTAGGA WUXUU KA FIICAN YAHAY DAAWEYNTA

Miyuu isku beddeli doonaa TB'ga firfircoon?

Ilaa 10% (halkiiba toban) ee dadka qabo TB'da qarsoon waxaa mustaqbalka ku dhici doono TB'da firfircoon. Ma jiro hab lagu ogaado haddii aad ka mid noqon doonto dadkaas. Waxaa suurtoagal ah in lagu jirrado TB'da firfircoon sanado badan ka dib goorta aad bakteeriyada TB neefsatey. Taasi waa sababta uu u fiican yahay inaad maankaaga dejiso iyo iska daaweyso TB'da qarsoon intii aad caafimaad qabto iyo ka hor intuu bakteeriyada noqon mid firfircoon.

BAARITAANKA IYO DAAWEYNTA TB'DA QARSOOD WAA BILAASH IYO QARSOODI

Waa maxay daaweynta aan u baahanahay TB'ga qarsoon?

Antibiyootiko ayaa daaweyn doono TB'da qarsoon. Waxaa lagu siin karaa daawada *Rifampicin* iyo *Isoniazid* ilaa seddax bilood (waxaa suurtoagal ah in labadaan daawo hal kaniini lagu magacaabo *Rifinah* la iskugu daro) ama daawada *Isoniazid* keligii ilaa lix bilood.

Tahtarkaaga ama kaaliyahaada ku takhasuusan TB ayaa kuu sharxi doono daaweynta iyo ka jawaabi doono wixii su'aalo ah aad qabtid. Hubi inaad u sheegto wixii daawo ah aad iminka qaadato, ay ku jirto kaniiniga uurka looga hortago, sababtoo ah waxaa suurtoagal ah inuusan shaqeyn markii aad qaadaneysid daawada TB.

Maxaan u baahanahay inaan ka ogaado daaweynta TB'ga qarsoon?

Si joogto u qaado daawadaada iyo wada dhamey. Habka ugu fiican ee lagu hubiyo in daaweyntaan waxtar kuu lahaado waa markii aad qaadato dhammaan daawada lagu qorey.

- Kaniinigaaga qaado isla waqti maalin walba.
- Isku xasuus-qor ku calaamadey taariikhda maalmaha aad daawada ama kaniiniga qaadatey.
- Mar walba kaniinigaaga ku hay isku meel.
- Isticmaal sanduuq yar ee qiyaasta usbuuca lagu shubo (sanduuqa dosette).
- Qaylo digniin ha ku xasuusiyo goorta kaniiniga la qaato.
- Saaxiib ama xubin qoys ha ku xasuusiyaan maalin walba inaad kaniinigaaga qaadato.

Daawoyinkaaga qaado waqtiyada u dhexeeyo

cunto cunidda iyo ha cabin khamri. Isku day inaad daawadaada TB qaadato ugu yaraan hal saac ka hor intii aadan cunto cunin ama laba saac ka dib. Waxaad cuni kartaa wixii aad doonto, laakiin ha cabin khamri.

Qor ficil-celinta ama waxyeellada daawada iyo u sheeg takhtarkaaga ama kaaliyaha caafimaad

sababtoo ah way kugu caawin karaan. Sida daawoyin walba, waxaa jiri karo ficil-celin ama waxyeelloyin ka yimaada daawada. Qaar ka mid ah waa khafiif, kuwo kalena way xun yihiin. Ayadoo ku xiran daawada lagu siiyey, waxaad dareemi kartaa ficil-celinada halkaan ku xusan:

Waxyeellooyin	Rifinah (Rifampicin iyo Isoniazid oo la isku darey)	Isoniazid
ilmada, candhuufta, kaadida iyo dheecaanada kale ee jirka oo oranji noqon karo - kuwaani waxyeello ma lahan laakiin waxaa laga yaabaa inay bar-wasaqeeyaan bikaasha indhaha la geliyo	Y	
Astaamo xummad	Y	
Dhibaatoyinka caadada	Y	
Waxtarka kaniiniga uur-joojiyaha oo yeraado	Y	
Jidhidhico ama kabuubyo	Y	Y
Finan ama cuncun	Y	Y
Matag ma shuban	Y	Y

Waa dhif in daawada sababo cagaarshow, kaasoo indhaha iyo maqaarka ka dhigi karo jaalle. Isoniazid iyo Rifinah waxay saamayn ku yeelan karaan araggaaga, laakiin kani xittaa waa dhif. Hase-yeeshee haddii aad isku aragto hal ka mid ah waxyeelloyinka, jooji daawada TB'da iyo si deg-deg ah la hadal takhtar ama kaaliye caafimaad.

Hubi inaad tegto dhammaan ballamadaada rugta caafimaad iyo inaad la xiriirto takhtarkaaga ama kaaliyaha caafimaad.

Takhtarkaaga iyo kaaliyahaada caafimaad waxay halkaan u joogaan si ay kuu caawiyaan. U sheeg haddii aad hilmaamto inaad kaniini qaadato ama u baahan tahay in lagugu caawiyo xasuusinta qaadashada daawada. Waxaad buuxin kartaa xasuus-qorka daaweynta ee ku lifaaqan buug-yarahaan iyo waxaad qori kartaa waxyaabaha aad rabtid inaad u sheegto takhtarkaaga ama kaaliyaha caafimaad.

Markaan dhameeyo daaweynta, weligey miyaan ka bogsan doonaa TB?

Waxaa mar walba jiro halis inaad bakteeriyada dib u neefsato mustaqbalka. Dadka badankooda waa dhif inuu ku dhaco, laakiin waxaa fiican inaad aqoonsato calaamadaha Tb'da firfircoon, iyo u tag GP'gaaga haddii aad isku aragto:

- qufac socdo seddax usbuuc ama ka badan
- xummad (qandho)
- dhidid habeenka
- hoos u dhaca miisaanka
- gaajo la'aan
- daal.

Halkaan ka heli karaa talo iyo taageero?

Kaaliyahaada caafimaad ee ku takhasuusan TB waa:
Takhtarkaaga isbitaalka waa:
Lambarkaaga xiriirka:
Email:

TB Alert: Ururka samafalka qaranka TB ee Ingiriiska

Telefoon: 01273 234029

Email: info@tbalert.org

www.tbalert.org • www.thetruthabout**tb**.org

Xasuus-qorka daaweynta

Weydii takhtarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad si ay kuu calaamadeeyaan taariikhyada daaweyntaada. Siddii aad maalin walba u xariiqdo markii aad daawadaada qaadata. Waxaad xittaa qori kartaa waqtiga ballankaaga takhtarka.

Qaadashada daawada TB'da qarsoon wuxuu ahaan karaa dhib, laakiin si dhaqsi ah ayaad xasuus-qorkaaga uga xariiqi doontaa maalmaha daaweynta. Waxaa markaa ogaan doontaa inaad ilaalisey caafimaadkaaga iyo midda qoyskaaga iyo asxaabtaada.

Bisha	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31
Bisha	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20	21	22	23	24	25	26	27	28	29	30	31